
The TB Skin Test (Mantoux) Somali

Warqadda Nuqulka ee Minnesota Department of Health

# Baaritaanka Maqaarka ee Cudurka Qaaxada (Mantoux)

Baaritaanka maqaarka ee cudurka qaaxada, waxaa mararka qaarkooda waxaa loogu yeera "Mantoux" waana qaab fudud, aan waxyeelo lahayn ee lagu ogaanayo in jirkaagu uu ku jiro jeermiska qarsoon ee qaaxada..



## Waa maxay jeermiska cudurka qaaxada (TB) ee weli aan waxyeelada lahayn?

Waxa jira laba nooc ee cudurka qaaxada (TB), labada qeybood waxaa lagu daweyn karaa daawooyin. Marka ugu horeeya jeermiska cudurka qaaxada (TB) uu jirkaaga galo, waxyeelo ma laha. Haddii aan la daweyn, waxaa uu cudurka qaaxada noqonayaa mid firfircoon.


Qof kasta wuu qaadi karaa cudurka qaaxada (TB) sababta oo ah wuxuu ku faafa qof illaa qof kale iyada oo cudurka hawada la iskaga qaada.

| **Marxalada 1 – Jeermiska cudurka qaaxada (TB) ee aan weli waxyeelada lahayn** | **Marxalada 2 – Cudurka qaaxada (TB) ee waxyeelada leh** |
|---|---|
| Jeermiska cudurka qaaxada (TB) wuxuu"ku qarsoon yahay" jirkaaga dhexdiisa. Marxaladan waxay jiri karta waqti aad u dheer – xittaa sanaooyin | Jeermiska cudurka qaaxada (TB) wuu firfircoon yahay awoodna wuxuu u leeyahay in unugyada jirkaaga waxyeeleeyo |
| Adiga uma muuqatid, mana dareemaysid in aad tahay qof bukaan ah. Raajada xabadkaagana waqti kasta waa iska caadi. | Badanaaba xanuun ayaad darameysa. Dhakhtarkaaga wuxuu kugu samayn doona baaritaan gaar ah si u helo cudurka qaaxada (TB) ee jirkaaga waxyeeleynayo. |
| Adiga uma gudbin kartid cudurka qaaxada (TB) dad kale | Haddii jeermiska cudurka qaaxada (TB) uu ku jiro sambabadaada, adigu waad ugu gudbin karta dadka kale waxaadna ugu gudbin karta qunfac, hindhiso, ama heesida |
| Sida caadiga ah waxaa lagu daweeya daawo oo la qaadanayo 9 bilood. | Waxaa lagu daweeya qaadasho 3 ama 4 dawooyin oo la qaadanayo ugu yaraan 6 bilood. |

## Sidee aan u sheegi karaa haddii aan qabo jeermiska cudurka qaaxada (TB) ee aan awooda lahayn?

Baaritaanka maqaarka ee cudurka qaaxada (Mantoux) ayaa ku ogaan karta haddii aad qabtid jeermiska cudurka qaaxada (TB). Adiga waad qabi karta cudurka qaaxada (TB) haddii aad mar la nooleyd qof ama dad cudurka qaaxada (TB) qaba (xittaa haddii adiga aadan ogeyn in ay jiran yihiin).

Dhakhtarkaaga daryeelka caafimaadka wuxuu isticmaali doonaa cirbad yar oo ku waxyeeleynin in uu kugu mudo maqaarka gacantaada dheecaan baaritaan ah lagu magaacaabo "Tuberculin".



## Dhakhtarkaaga daryeelka caafimaadka WAA IN UU eega gacantaada 2 ama 3 maalmood kaddib baaritaanka maqaarka ee cudurka qaaxada (TB), xittaa haddii uu gacantaada aysan waxba qabin

Haddii aad baaritaanka ka heshid wax ficil celin ah, wuxuu u ekaan doona meel sare oo soo barartay oo kale. Dhakhtarkaaga daryeelka caafimaadka ayaa cabiri doona qiyaasta ficil celinta meesha irbida lagu muday. Haddii uu jiro barar yar, waxay ku baabi' doonta isbuucyo gudahooda.

## Sidee baan u daryeeli karaa gacanteyda kaddib baaritaanka maqaarka ee qaaxada (TB)?

- Ha ku daboolin meesha la muday faashad ama sharooto.
- Ka taxadar in aad xoqdid meesha la muday.
- Haddii meesha ay ku cun-cunto, maro qabow korka ka saar.
- Waad dhaqi kartaa gacantaada si tartiibna waad u qalajin kartaa.

# Baaritaanka Cudurka Qaaxada (TB) ee laga baaro Maqaarka (Mantoux) - bogga 2

**Ha ka baqin in lagaa baaro. Cudurka Qaaxada (TB) waa la daaweyn kara!**

### Maxaa dhacaya haddii baaritaanka maqaarka ee cudurka qaaxada aan laga helin meesha la muday?

Baaritaanka waxa weye "ma qabtid cudurka qaaxada" haddii aan soo bararin goobta la muday (ama barar aad u yar oo keliya) meesha lagu muday dheecaanka. Haddii jeermiska laga helin maqaarka, baaritaanka maqaarka ee cudurka qaaxada sida caadiga ah macnaheeda waxa weye adiga ma qabtid cudurka qaaxada (TB).

Xaaladaha qaarkooda, waxa aad u baahnaan kartaa in maqaarkaaga mar kale laga baaro cudurka qaaxada.

### Maxaa dhacaya haddii baaritaanka maqaarka ee cudurka qaaxada laga helo meesha la muday?

Baaritaanka waxa weye "Wad qabta cudurka qaaxada"haddii meesha dheecaanka laga muday ee maqaarka uu wax yar soo bararo. Arrintani macnaheedu waxa weye in jeermiska cudurka qaaxada (TB) uu ku jiro jirkaaga. Dadka badan ee laga helo cudurka qaaxada (TB) ee la xiriira baaritaanka maqaarka waxay qabaan jeermiska cudurka qaaxada. Si loo hubiyo, dhakhtarkaaga ayaa ku baari doona wuxuu kaa qaadi doona raajada xabadka. Waxaad u baahan doontaa baaritaan kale si loo eego haddii aad qabtid cudurka qaaxada (TB) ee firfircoon.

**Waxa aad badbaadisaa caafimaadkaaga iyo caafimaadka qoyskaaga - waxaa aad heli kartaa in maqaarkaaga laga baaro cudurka qaaxada (TB)!** Si aad u heshid baaritaanka maqaarka ee cudurka qaaxada (TB), la xiriir dhakhtarkaaga ama waaxda caafimaadka bulshada ee xaafadaada.

### Waa in aad heshaa baaritaanka maqaarka ee cudurka qaaxada haddii:

- aad xiriir in badan la lahayd dad qaba cudurka qaaxada oo firfircoon,
- aad ku nooleyd wadan dad badan ay qabaan cudurka qaaxada (TB),
- aad ka shaqeysid ama ku nooshahay guriga waa-yeelka lagu xanaaneeyo, isbitaal yar, isbitaal, xabsi, ama hooyga ay ku nool yihiin dadka aan guryaha lahayn, ama
- aad qabtid jeermiska cudurka HIV ama dhibaatooyin kale ee la xiriira caafimaadka.

### Maxaa dhacaya haddii horey aan u qabay tallaalka BCG?

Xittaa haddii hore aad u qabtay tallaalka BCG, waxa aad samayn kartaa baaritaanka maqaarka ee cudurka qaaxada (TB).

- Dadka hore u qaatay tallaalka BCG weli way heli karaan jeermiska cudurka qaaxada ee awoodda lahayn iyo kan firfircoon ee cudurka qaaxada (TB).
- Tallaalka BCG wuxuu caawiya ka badbaadinta carruurta yar yar in ay aad ugu xanuunsadaan cudurka qaaxada (TB). Badbaadintan waxay ka anfacaysaa dadka marka ay da'dooda si kordhayso.
- Tallaalka BCG mararka qaarkooda waxay sababtaa ficil celinta baaritaanka maqaarka ee cudurka qaaxada maqaarka. Laakiin haddii aad heshid ficil celin qabitaan ah ee baaritaanka maqaarka ee cudurka qaaxada (TB), waxaa dhab ah in jeermiska cudurka qaaxada (TB) uu ku jiro jirkaaga – ma aha mid ka yimid tallaalkaaga BCG.

**Waad heli kartaa baaritaanka maqaarka ee cudurka qaaxada (TB), xittaa haddii aad hore u qabtay tallaalka BCG!**

MINNESOTA MDH DEPARTMENT OF HEALTH
Tuberculosis Prevention and Control Program
P.O. Box 64975
St. Paul, MN 55164-0975
651-201-5414
1-877-676-5414
www.health.state.mn.us/tb

5/2004